



Barnaamijka Sawir Ka Saarida Derbiyada

Foomka Bixinta Oggolaanshaha

(Fadlan si sharci ah foomka ugu buuxi qoraal daabacan)

MAGACA MILKIILAHA GURIGA: _____

LAMBARKA TALEEFANKA EE MILKIILAHA GURIGA: _____

IIMAYLKA MILKIILAHA GURIGA: _____

*Macluumaadka Guriga: Si gaar ah u tax cinwaannada guryaha & isticmaal foom kale haddii aad hayso wax ka badan saddex guri.

**Calaamadeey sanduuqa
haddii gurigaaga
derbigiisa ay sawiro ku
sawiran yihiin**

CINWAANKA GURIGA

TACOMA, WA

KOODHKA ZIPKA

TACOMA, WA

TACOMA, WA

TACOMA, WA

Qofka hoos ku saxiixan wuxuu qirayaa in isaga(iyada) uu yahay mulkiilaha ama wakiilka idman ee guriga kor lagu tilmaamay isla markaana uu caddeeynayo:

Waxaan halkan ku codsanayaa oo aan u fasaxayaa Magaalada Tacoma, ama qandaraaslaheeda, iyadoo la isticmaalayo Barnaamijka Sawiro Ka Saarista Derbiyada inay soo galaan gurigayga, haddii loo baahdo, si sawirada ku sawiran derbiyada ay uga saaraan goobta(goobaha) kor ku xusan. Waxaan fahamsanahay in ay tahay go'aanka Magaalada ama qandaraasleheeda, habka ama qaabka loo isticmaalayo in meesha looga saaro qoraallada/sawirada ku qoran guriyaga. Waxaan halkan ku cadaynayaa inaan waxba u qabsan doonin oo aan Magaalada Tacoma, saraakiisheeda, shaqaalaheeda, wakiiladeeda, qandaraaslayaasheeda iyo mutadawiciinteeda ka dhaafayo dhammaan mas'uuliyadda, sheegashooyinka, dalabaadka, sababaha ficilka ama waajibaad kasta, kuwa la yaqaan iyo kuwa aan la garanayn, si toos ah ama si dadban, uga soo baxa ama la xiriira soo gelida gurigayga iyadoo ujeedada tahay in sawirada/qoraalada laga saaro derbiyada gurigayga sida waafaqsan Barnaamijka Sawiro Ka Saarista Derbiyada oo ay ku jiraan, lakin aan ku xaddidnayn, dhammaan sheegashooyinka mas'uuliyadda ama dalabaadka dhaawaca shaqsiyeed, dhimashada iyo waxyeellada guriga, muuqaalka ama xaalada guriga.

Waxaan qirayaa in oggolaanshahani uu ansax yahay laga bilaabo taariikhda saxiixa ilaa Janaayo 1, 2025 marka laga reebo haddii aan iska iibiyo guriga kor ku xusan taariikhdaas kahor. Waqtiga aan iska iibinayo, waxaan ogeysiin doonaa magaalada si oggolaansho cusub looga helo mulkiilaha cusub.

Intaa waxaa dheer, waxaan fahamsanahay in kani yahay mashruuc lagu sameeynayo go'aanka Magaalada Tacoma ama qandaraaslaheeda. Helitaanka warqaddan oggolaanshaha ah ma dammaanad qaadayso in adeegga la fulin doono waxayna ku salaysan tahay helitaanka lacag lagu fulin karo hawsho. Marka loo eego Xeerka Degmada Tacoma, mulkiilaha guriga ayaa mas'uul ka ah ka saarista qoraallada/sawirada ku qoran derbiyada guryahooda.

Waxaan halkan ku qirayaa inaan ahay mulkiilaha guriga ee runta ah ama wakiil u idman guriga, oo waxaan si buuxda u sheegayaa in macluumaadkani uu yahay mid sax ah oo run ah, waxaan Magaalada Tacoma siinayaa awooda ah inay fuliso codsigan.

MAGACA OO FAR WAAWEYN AH: _____

Milkiilaha Guriga ama Wakiilka Idman

SAXIIXA: _____ **TAARIIKHDA:** _____

Milkiilaha Guriga ama Wakiilka Idman

Fadlan buuxi oo iimayl ugu dir foomka oggolaanshaha graffiti@cityoftacoma.org

* Kaliya guryaha ku yaala magaalada Tacoma ayaa loo tixgaliin doonaa ka qaybgalka barnaamijkan.